

Su'aalaha Caafimaadka ee Qaangaarka iyo Dhallinta (11-20 Sano)

Magacaaga/Waxa aad jeceshahay in laguugu yeero: _____

Magac-u-yaal: _____

Jinsiga lagu qoray marka aad dhalatay (sida ku cad shahaadadaada dhalashada ee saxda ah): _____

Aqoonsiga jinsigaaga: _____

Waa kuwee afarta eray ee faahfaahin wanaagsan ka bixin karo? _____

Maxaad doonaysaa in aad ka faa'iido booqashada maanta? _____

Waxaan bukaan kasta weydinaa su'aalahaan oo ku saabsan waxyaabaha saameyn karaa caafimaadkaaga iyo badqabkaaga. Su'aalaha qaar ayaa laga yaabaa in aysan kuugu habboonayn. Waa caadi in aad su'aalaha qaar ka jawaabin. Fadlan keligaa ka jawaab su'aalahaan, adiga oo caawinaad ka helaynin waalidkaaga ama asxaabtaada, oo daacad noqo inti suurtagal ah. Jawaabahaagu waa sir.	FADLAN GOOBAABI JAWAABTAADA	MA DOONEYSAA MACLUUMAAD DHEERAAD?
1. Guud ahaan, miyaad ku faraxsan tahay sida ay wax kuugu socdaan?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
2. Miyaad suunka korsiga ku xirataa baaburka?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
3. Ma xirataa koofiyadda madaxa marka aad wadato skateboard, baaskiilka, mootada, mootada barafka, ama ATV?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
4. Miyaad heeshiis la tahay qoyskaaga?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
5. Ma leedahay ugu yaraan hal qof oo qaangaar ah oo aad runti la hadli karto?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
6. Ammaan ma ku dareentaa guriga, dugsiga iyo bulshadaada dhexdeeda?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
7. Ma heshaa 60 daqiiqo oo jimicsi ah maalmaha toddobaadka intooda badan?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
8. Ma kula tahay in misaankaaga iyo dheerarkaagu ay sida laga rabo yihiin?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
9. Weligaa ma ka boodaa wakhtiyada cuntada, isticmaashaa daawooyinka caloosha socodsiiya ama kaniinada la isku caateeyo, ama ma ismatajisaa si aad isugu caateeyso ama aad u xakameeyso misaankaaga?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>

AYA QUESTIONNAIRE

10. Miyaad dugsiga ka baaqatay in ka badan 7 maalmood sanadkaan?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
11. Kaalintaada miyay ka liidataa sisi hore?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
12. Adiga ama qof kale oo aad la nooshahay ma heystaan ama wataan qori?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
13. Ma ka fikirtaa lacag, meel aad ku noolaato, raashin ama dhar?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
14. Weligaa ma ka carartay guriga?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
15. Weligaa ma ka tirsanayd koox burcad ah (hadda ama wakhti hore)?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
Jawaabahaaga waa kuwa sir ah oo idinka dhaxeeyo adiga iyo bixiyaha daryeelkaaga caafimaad. Waxaa keliya macluumaadkaan kala hadli doonaa waalidkaaga/qofka mas'uulka kaa ah haddii aan welaac weyn ka qabno caafimaadkaaga iyo badbaadadaada. Ka hor inta aanan la hadlin waalidka/ qofka mas'uulka kaa ah, adiga ayaa kaa la hadli doonaa.	FADLAN GOOBAABI JAWAABTAADA	MA DOONEYSAA MACLUUMAAD DHEERAAD?
16. Weligaa ma is-dhaawacday ama ma is jartay si ula kac ah?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
17. Weligaa fariin ama sawir anshax xumo ma dirtay/ma lagu soo diray?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
18. Weligaa ma sameysay wax galmo ah?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
19. Weligaa ma kuugu dhacay caabuq ku faafa galmada? (sida herpes, jabtada (gonorrhoea), chlamydia, burooyinka xubnaaha taranka (genital warts), cudurka bararka miskaha (pelvic inflammatory disease), HIV, isfiilto/waraabowga (syphilis))	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
20. Weliga ma sameysay galmo ama fal galmo si aad u hesho lacag, cunto, hoy, ama wax kale?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
21. Ma tahay, mise waligaa ma isweydiisay in aad tahay dadka jecel dadka ay isku jinsiga yihiin?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
22. Ma tahay, mise waligaa ma isweydiisay in aad tahay jinsi-beddel ama jinsigaaga uu ka duwan yahay kan laguugu aqoonsan jiray (wiil ama gabar) marka aad dhalatay?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
23. Weligaa jir ahaan, galmo, ama shucur ahaan ma laguugu xadgudbay? (sida in lagu haraantiyay, garaacay, qasbay ama laguugu khiyaaney galmo, taabtay hab aadan kaa farxinin, lagu dhahay qiimo ma lihid)	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
24. Weligaa ma isku dayday in aad is disho?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>
25. Miyaad la kulantay dhacdooyin walaac ama cabsi ah oo weli ku dhibaaya?	Haa Mar mar Maya	<input type="checkbox"/>

AYA QUESTIONNAIRE

Haddii aad hal shay iska beddeli laheyd noloshada ama naftaada, maxay ahaan ahayd?

Waa maxay waxa ugu muhiimsan ee aad doonayso in aan booqashada rugta caafimaadka ee maanta diiraadda ku saarno?

Questions about tobacco, alcohol, marijuana, other drugs

SANADKI LA SOO DHAAFAY, meeqa jeer ayaa isticmaashay:	Marna	Hal mar ama labo jeer	Bil kasta	Usbuuc kasta
Tubaakada: sigaarka, qayilka, ama sigaarka elektirooniga ah ama vape, sida JUUL, suurin, blu, VUSE, ama logic?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Khamriga	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xashiiska	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Miyaad isku dayday dawooyin kale si madadaalo ah, xiiso ama la qabso, sida kaniiniyada dhakhaatiirta soo qorto, daroogada sanko laga qaato, salvia, K2, ama daroogo kale oo sharci darro ah?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Waa dhameysay! Mahadsanid!

For office use:

An option is to offer the complete [S2BI \(nida.nih.gov/s2bi\)](https://nida.nih.gov/s2bi) for validated substance use screening and recommendations based on results. These screening questions correspond to the brief office-based intervention algorithm for young people 9-18 years of age: [Alcohol Screening and Brief Intervention for Youth \(www.niaaa.nih.gov/alcohols-effects-health/professional-education-materials/alcohol-screening-and-brief-intervention-youth-practitioners-guide\)](https://www.niaaa.nih.gov/alcohols-effects-health/professional-education-materials/alcohol-screening-and-brief-intervention-youth-practitioners-guide).

NOTE: Standardized mental health screening is required for C&TC visits at 12-20 years of age. Refer to the [Mental Health Screening \(6-20 Years\) C&TC Fact Sheet \(www.health.state.mn.us/docs/people/childrenyouth/ctc/mentalhealth.pdf\)](https://www.health.state.mn.us/docs/people/childrenyouth/ctc/mentalhealth.pdf) for instrument and referral recommendations.

Foomka waxaa ku diyaariyay:

Minnesota Department of Health
Child and Teen Checkups
651-201-3650

AYA QUESTIONNAIRE

health.childteencheckups@state.mn.us

www.health.state.mn.us

12/2023

Si aad xogtaan ugu hesho qaab kale, la xiriir: 651-201-3650.